

## Bayaanka Saameynta Sinnaanta ee 2022 Barnamijka Dayactirka Degdegga ah

**Cinwa**

**aanka:** 2022 MSBA Barnamijyada Dayactirka Degdegga ah ee Faa'idada

**Taariikh:**

Maarso 16, 2022

Wuxuu ahaa [Agabka Qorshaynta Sinnaanta](#) isticmaalay?  Haa  Maya

Haddii haa tahay, geli taariikhda kulamada REPT oo ku xir halkan REPT oo dhammaystiran: \_\_\_\_\_

Miyuu xubin ka ahaa Qeybta Sinnaanta, Xeelada iyo Nusqaamaha Fursad dib-u-eegay bayaankan?  Haa  Maya

Qaybaha Agabka Qorshaynta Sinnaanta Isirka BPS	Soo koobida/Caqli galka
<p><b>1. Soojeedin/Bandhig &amp; Saameyn</b> <i>Maxay yihiin soojeedinta/dadaalka natiijooyinka la rabay, oo ay ka mid tahay ciribtirka kala duwanaanshaha? Ayaa hogaamiyay shaqadan /qorshaynta, oo ma waxay ka tarjumayaan ardayda BPS iyo qoysaska aqoonsiga kooxda (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyadka Madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, soogalooti, luqado badan, oo leh khibrad Waxbarasho Gaar ah)?</i></p>	<p>Sannad kasta, Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxay u soo gudbiyaan soo jeedinta Maamulka Dhismaha Dugsiga Massachusetts (MSBA) ee loogu talagalay Barnamijkooda Dayactirka La Dadajiyay (ARP). Barnamijkani waxa uu u ogolaanayaa in la dayactiro hababka dhismaha ee duugoobay, sida saqafka, kuleyliyaha, iyo daaqadaha. Kooxaha Maaliyadda, Hawlaha, iyo Xarumaha BPS, iyagoo kaashanaya Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Magaalada Boston, waxay ku talinayaan mashaariicda ARP ee soo socota iyadoo lagu salaynayo dib u eegis lagu sameeyo xaaladaha dhismaha.:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Kuleyliyeyaasha dugsiyada sare ee Burke, Curley, Haley Pilot, iyo Warren Prescott;</li> <li>• Saqafka sare ee Henderson High iyo Ohrenberger; iyo</li> <li>• Saqafka iyo daaqadaha Dugsiga Sare ee Ingiriisiga.</li> </ul> <p>Dayactirkaan ujeedadiisu waxay tahay in la hubiyo badbaadada dhismayaasheena ardayda iyo shaqaalaha, waxaana hadda la kala hormariyaa iyadoo lagu salaynayo degdegga ah ee dayactirka loo baahan yahay.</p> <p>Kooxda qorsheynta ee mashruucan waxaa ka mid ah Nathan Kuder, David Bloom, iyo Katie Kline oo ka socda Maaliyadda; Indira Alvarez, Teresa Neff-Webster, iyo Amy Shan oo ka socda Hawlgallada; Brian Forde oo ka socda Xarumaha BPS; iyo Kerrie Griffin oo ka socda Xarumaha Magaalada Boston. Kooxdani waxay xoogaa wakiil ka tahay tirakoobka ardayda BPS.</p>
<p><b>2. La jaanqaadida Qorshaha Xeeladeed</b> <i>Siddee soojeedinta/ dadaalka la jaanqaaday qorshaha xeeladeed ee degmada?</i></p>	<p>Hagaajinta tayada xarumayaasheena waxay si buuxda ula jaanqaadaysaa Mudnaanta Qorshaha Xeelada ah 4.4: "Horumar la taaban karo ku samee BuildBPS si aad u abuurto siman, qarniga 21aad, goobo waxbarasho oo badbaado iyo kobcin..."</p>
<p><b>3. Falanqaynta Xogta</b> <i>Waa maxay xogta la falanqeeyay? Ma waxaa lagu kala saaray jinsi iyo kooxo kale oo muhiim ah? Maxay muujisay marka loo eego kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Waxaan dib u eegnay xogta ku saabsan da'da nidaamka dhismaha iyo nolosha waxtarka leh ee hadhay sida waafaqsan Bayaanka Xiisaha ee MSBA.</p>
<p><b>4. Kaqeybgalka Daneeyayaasha</b> <i>Yaa ku hawlanaa (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sidee, maxaase ka dhashay taasi? Maxay ardayda / qoysasku saamaynta ugu badan ku yeeshen soo jeedintan /</i></p>	<p>In kasta oo aynaan si gaar ah ula macaamilin ardayda iyo qoysaska arrimaha ku saabsan mashruucan, ka qaybgalayaasha shirar bulsho oo kala duwan sannadihii u dambeeyay ee la xidhiidha BuildBPS iyo mudnaanta kale ee degmada waxay carrabka ku adkeeyeen baahida adag ee lagu hagaajinayo xaaladaha dhismaha.</p>

<p><i>dadaalkaan sheegteen?</i></p>	
<p><b>5. Xeeladaha Sinnaanta Isirka</b> <i>Sidee soo jeedintan / dadaalkani u yareysaa kala-duwanaanta iyo kordhinta isirka iyo sinnaanta kale? Maxay yihiin cawaaqibta aan la filayn? Maxay yihiin xeelado dhameystiran oo sii horumarin doona sinnaanta?</i></p>	<p>Mashruucyadani waxay xaqiijinayaan in ardayda BPS ay ka qaybgalaan jawi waxbarasho oo tayo sare leh oo ay mudan yihiin.</p> <p>Kooxda BuildBPS waxay sii wadi doonaan qorshaynta hagaajinta iyo beddelka nidaamyada iyo dhismayaasha si loo xaqiijiyo badbaadada, horumarinta sinnaanta, iyo taageerada waxbarashada.</p>
<p><b>6 Miisaaniyad &amp; Hergelinta</b> <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadda? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeeddooyinka oo dhan, gaar ahaan ujeeddooyinka sinnaanta la xiriira, in la fuliyo? Maxay yihiin aqoonsiyada koox ee kooxda fulintu, oo ma waxay keeni doonaan muraayad sinnaan ah?</i></p>	<p>Mashaariicdan waxa maalgelin doona dhaqaalaha raasumaalka ee magaalada Boston iyo kharashka MSBA.</p> <p>BPS waxay hadda codsanaysaa lacagahan. Haddii la ansixiyo, kooxda fulinta ayaa la ururin doonaa.</p>
<p><b>7. Isla-xisaabtan &amp; Is-gaarsiin</b> <i>Sidee saamaynta loogu yeelan doonaa qiimeyn, diiwaangelin iyo la socodsiinta daneeyayaasha? Yaa masuul ka noqon doona?</i></p>	<p>Qaybta Hawlgallada waxa ay bilaabaysaa Qiimaynta Shuruudaha Xarumaha si ay si wanagsan u diiwaan geliso xaaladda hadda ee dhismayaasha BPS iyo, muddo ka dib, si loo diiwaangeliyo hagaajinta. Qiimayntan waxaa lagu dari doonaa mareegaha degmada si ay dadweynuhu u awoodaan inay helaan macluumaadka. Hoggaanka Hawlgallada ayaa mas'uul ka noqon doona ururinta macluumaadka, iyo hubinta in si joogto ah loo cusboonaysiiyo oo loo daabaco.</p>